WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2013

# AF-SOOMAALI

2013

XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

**MAGAC: ……………………………………………………………………………………………**

**DUGSI: ………………………………………………………………………………………………**

**ROOL LAMBAR: ………………………………………………………………………………**

**DAWLADDA PUNTLAND**

**WASAARADDA WAXBARASHADA**

**XAFIISKA IMTIXAANAADKA**

**IMTIXAANKA AF-SOOMAALIGA FASALKA AFRAAD EE DUGSIGA SARE 2013**

**AMIN: 2 SAAC**

**LAGU DARAY 10 DAQIIQO OO WARQADO AKHRIS AH**

**TILMAAMAHA IMTIXAAN-GALAHA:**

a. **WAXAA IMTIXAANKU KA KOOBAN YAHAY 14 BOG.**
b. **BOGGA LABAAD WAA FEEGAAR LAMA SAXAYO WIXII LAGU QORO.**
c. **TIRI BOGAGGA, HADDAY WAX KA MAQAN YIHIIN U SHEEG ILAALIYAHA IMTIXAANKA.**
d. **WUXUU IMTIXAANKU KA KOOBAN YAHAY 06 QAYBOOD OO KALA AH SIDAAN:**

1. **SHEEKO …………………………………………………………………………………………………… 15 DHIBCOOD**
2. **NAXWE……………………………………………………………………………………………………10 DHIBCOOD**
3. **SUUGAAN…………………………………………………………………………………………………25 DHIBCOOD**
4. **HIDAHA IYO DHAQANKA……………………………………………………………………………15 DHIBCOOD**
5. **ERAYO……………………………………………………………………………………………………15 DHIBCOOD**
6. **WEYDIIMO LUUQADEED…………………………………………………………………………05 DHIBCOOD**
7. **CURIS………………………………………………………………… ………………………………15 DHIBCOOD**

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**WARQADAN KU FALAAD ( KU FEEGAAR) LAMA SIXIDOONO WIXII AAD KU QORTID**



©PNEB, 2013

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**Akhri sheekadan dabadeedna ka warceli weydiimaha kaaga iman doona**

Waxa ay ahayd maalin aad u kulul,waxaan ahayn geeddi,waxaan marayney meel hawd ah,waxaan ka hadhay geelii si aan midho u gurto.

Mirihii markaan ka giigay ayaan kobtii kasoo baxay,waxaan koray dundumo dheer ,dabadeedna waxaan bidhaamiyey geelii iyo dadkii,hase yeeshee nasiib darro wax aan dhir ahayn indhaygu maqaban.naxdin iyo argagax ayaa markiiba itaabtay,dabadeedna sidii wax waalana ayaan dhankii geeddiga foolkiisu u jeeday orod isu dhigay.
Shaacu markii uu madoobaadey ayaan aniga oo baydadaya sanqadh dabadayda ka maqlay.
Goortii aan istaagey ayey sanqadhii joogsatey,hase ahaatee mar labaad haddaan dhaqaaqay waxaan maqlay isla sanqadhii,wuxu inuu libaax yahay shaki igama gelin.Naftu orod bay kugu aamaintaaye,cagaha inta aan miciinsaday ayaan geed dheer dhalada uga baxay,judhiiba Aarkii ,Gooshii iyo cago baruuradii ayaa geedkii soo hoos istaagey.

Habeenkaas cabsi,daal ,gaajo ,oon ayaa deris ila ahaa,wuxuu habeenkii dhan libaaxu I hoos galgashoba,qorraxdu markii ay big soo tidhi;ayuu inta uu yare dhaqaaqay kob agtayda ah beerka soo dhigay.Waxaa meeshii soo maray geelal jalaqle ahaa oo ceelka u socdey,maalintaasna waxaan ka nabad galay libaaxii.
Labo caano maal ka dib ayaan geelii iyo walaalkay soo gaadhay,hase yeeshee waxaa abaal gud la iiga dhigay toban maalmood oo ciqaab ah.
Sannadkii aan sagaal jirsadey ayaa walaalkay cali guursaday,golihii geelana ka tegay,geela xilkiisiina waxaa tuurta u ritey walaalkay kulmiye,oo ahaa nin aad u naxariis daran.
Walaalkay kulmiye dilmo iyo dagaal buu dheef iiga dhigay .sidaa daraadeedna waxaa igu adkaatay in aan la joogistiisa,inkasta oo aan geelayga aad u jeclaa lexejacladiisuna igu dheerayd,hadana waxaan goostay in aan iskaga tago oo aan tahriibo,mar haddii ul iyo af-xumo sed ii noqdeeninkasta oo ay da'daydu ahayd saqaal jir ,hadana subax keliya baan aniga oo aan is ogey dhaqaaqay.
Afar caano maal markii aan fool u jeed ahaa ,ayaan gaalkacayo aniga oo dhacsaal ah ku soo hoydey,nasiib darro cidna kama aan garayn magaalada ,waxaan lalafaysta maqaaxi ku taal meeshii aan magaalda kaga soo beegay. Habeenkiina waxaa wiiqa dhigay cooshad lagu qayilay oo qarmuun badni ka soo urayo.Waqti iskama lumin joogada gaalkacayo,ee waxaan islamarkiiba falankeeda galay sidaan Boosaaso u aadi lahaa.
Subaxdii waxaa aan halabsaday baabuur boosaaso u baxayey,gaarigu waxa uu sidey adhi.
Waxaan ninkii ku idhi "ka warran haddiin aan lacagla'aan adhiga kuugu xarraaso",dabadeedna waa uu iga yeelay. Muddo saddex bilood ah ayaan ninkii lacag yar ugu shaqaynayey.
Waxaa urursaday waxoogaa lacag ah ,aniga oo cindiga ku hayo in aan meesha katabcado lacag aan ku tahriibo.Ka dib markii aan magaalada boosaaso dhexgalay waxan isbaranay dhallinyaro badan oo wanaagsan waxa ay igala taliyeen in aan tahriibo ama burcad badeedda ku biro.
Waxaan warsaday waxa ay igu la talinayaan in aan qabto dabadeedna waxa ay ii tilmaameen,dugsi ay dhigtaan dadka waxbarashada ka habsaamay;dugsigii ayaan galay ilaa dhexe dabadeedna waxaan ku biiray dugsiga sare ee Boosaaso,waxbarashadiina waxaan waday ilaa jaamacad .hadana waxaa ka shaqayaa shirkada Golis


©PNEB, 2013

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**Q/1AAD: SHEEKO……………………………………………………………………………25 dhibcood**

I. DOORO WARCELINAHAN SOO SOCDA TAN UGU SAXSAN (10 dhibcood)

1) Waqtigi i uu Ducaale habaaabay waxa ay ahayd:
   a. Subax
   b. Galab
   c. Habeen
   d. Maalin

2) Wiilku wuxuu kaynta u galay in uu:
   a. Seexdo
   b. U kortago
   c. Midho ka gurto
   d. Ku dhuunto

3) Ducaale markii uu arki waayey dadkii iyo xoolihii wuxuu fuulay:
   a. Buur dheer
   b. Geed dheer
   c. Dundumo dheer
   d. Kur dheer

4) Libaaxa dhaddig waxaa loo yaqaan:
   a. Gool
   b. Aar
   c. Arbe
   d. Caga-baruur

5) Ducaale markii uu yimid waxaa abaal barin looga dhigay:
   a. Ciqaab
   b. Canaan
   c. Caano
   d. Calaacal

6) Waxaa Ducaale geela la hayey walaalkiis:
   a. Ciise
   b. Cali
   c. Cumar
   d. Cismaan

7) Markii uu Cali guursadey golihii geelna ka tegey waxaa xilkii tuurta u ritey:
   a. Kulmiye
   b. Kilwe
   c. Kooshin
   d. Kaliil

8) Wuxuu Ducaale miyiga ka tegey isagoo da'diisu tahay:
   a. Sagaal jir
   b. Toban jir
   c. Laba iyo toban jir
   d. Shan iyo toban jir

9) Ducaale waxaa ku kalifey in uu geeloodii ka dhaqaaqo,isaga oo sed looga dhigay:
   a. Ul iyo af xumo
   b. Dhib iyo dheef
   c. Dhuuni iyo dhereg
   d. Dhar iyo dhaqaale

10) Magaaladii ugu horrayse ee uu ducaale yimid waxa ay ahayd:
   a. Garoowe
   b. Gaalkacayo
   c. Gebiley
   d. Galdogob


©PNEB, 2013

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com
SOM EXAMS

**II.** WARCELIN GAABAN KA BIXI WEYDIIMAHAN SOO SOCDA (05 dhibcood)

1. Xaggee ayuu wiilku aadey markii uu habaabay?______________________________
2. Muxuu kaynta ka doonay ducaale?__________________________________________
3. Muxuu Ducaale u goostay inuu geela ka tago_________________________________
4. Sidee ayuu wiilku libaaxyada uga nabad galay________________________________
5. Ilaalinta geela ka sukoow ,maxay ahayd Ducaale shaqadiisu____________________

III. ERADAN ISUGU AADDI SIDA AY ISU LEEYIHIIN (05 dhibcood)

| | |
|---|---|
| 1. Caano-maal | Markii aad cunto aad uga dheeerto. |
| 2. Ka giigay | Qof daal fara badan dareemaya. |
| 3. Dhacsaal | Markii wax kaa lumay ilbaadinaysid |
| 4. Bidhaamin | Wax didsan ama dhiillo ka muuqato |
| 5. Baydad | Waa habeen iyo maalin isku soo wareeg ah |

IV. ERAYADAN KUWO LA MACNE AH KA SOO SAAR SHEEKADA (05 dhibcood)

1. Ka dhergey ___________________________
2. Seexday ___________________________
3. Irkigay ___________________________
4. Cadceed ___________________________
5. Cawo ___________________________

**Q/2AAD: NAXWE………………………………………………………………………14 dhibcood**

I. MAGACYADAN SOO SOCDA RAACI QODOBKA KU HABBOON (03 dhibcood)

a. Nayl _________________
b. Mallay_________________
c. Waxar_________________
d. Wan ___________________
e. Dermo___________________
f. Wadne___________________

II. ISKU BEEG MAGAC U YAALKA IYO NOOCA UU YAHAY (05 dhibcood)

| | |
|---|---|
| a. **Kayga** ayaa la doortay | Magac u yaal ebyoon |
| b. **Kuma** ayaa ah waalidkiis | Magac u yaal aan cayinayn |
| c. **Tani** waa hooyadaa | Magac u yaal tilmaame ah |
| d. **Kuwo** ayaa yimid | Magac u yaal weydiimeed |
| e. **Isaga** doorta weligiin | Magac u ayaal lahaansho |


©PNEB, 2013
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

## III. ERAYADAN KELIDA AH WADAREE (03 dhibcood)

a. Dameer_________
b. Caws ___________
c. Wadal___________
d. Wabar_____________
e. Damaq _____________
f. Madag_____________

## IV. MAGACYADAN U KALA SOOC KUWO GUUD IYO KUWO GAAR AH (03 dhibcood)

| Tiro | Magacyo isku jir ah | Magacyo gaar ah | Magacyo guud |
|---|---|---|---|
| 1. | Magaalo | | |
| 2. | Xiin-finiin | ________________________ | ____________________ |
| 3. | Wiilwaal | ________________________ | ____________________ |
| 4. | Faras | ________________________ | ____________________ |
| 5. | Gaatama | | |
| 6. | Geedo | | |

**Q/3AAD: SUUGAAN……………………………………………………………………23 dhibcood**

**Akhri gabayadan dabadeedna ka warceli weydiimaha kaaga iman doona**

Faadumo islaan Aadan ,oo la dhalatay islaan Aadan islaan Faarax ,oo ka mid ahaa madaxdii mudug ka talinaysey waagaas,ayaa waxaa doonay oo u gole fadhiisya ;seyid Maxamed C/dulle Xasan,si uu garab iyo gaashaan uga helo.
In kastoo Seyidku xididtinimo wanaagsan muujiyey,uuna bixiyey xoolo badan oo isug u jiraishkin iyo gammaan,hadana islaan Aadan ayaa seyidka weydiistey faraskiisii Xiin- finiin ,oo aad ugu weynaa seyidka.
Seyidku wuxuu go'aansaday in uu bixiyo faraska ,si aan loo xaman,xilkana uu isga reebo,wuxuuna sii dhiibey faraskii salabkiisu u dhan yahay iyo gabaygan:

1. Xaayoow Faaraxoow hadal rag waa loo xutubiyaaye.
2. Nin xishoonaayaan ahay hadii aan lay xisdiyihayne.
3. Xabiib baan ahaa jeer kufriga laygu xaasideye.
4. Adna xaashi baad iila timid xaakin soo qoraye.
5. Xaddigii adduunyada haddaad xoola iga dooni.
6. marna anigu kaama xisdiyeen xaald leedahaye.
7. Inaaaan kuu xaf gooyaan jeclaa geel xawaad badane.
8. Kumanyaal xeroodaan lahaa xawd usii mariye'
9. Markaadse xiinfiniin damacday baan kaa xanuunsadaye.
10. Maandhoow xirgiga qaarki waa lagu xujoobaaye.


©PNEB, 2013
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

**A :Ku buuxi meelaha bannaan erayga ku habboon ee ku jira bilaha dhexdooda** **(03 dhibcood)**

1. Xiin finiin seyidku wuxuu siiyey________________________________________
   (Faarax-dhabar sange, Islaan Aadan, Faaadumo islaan,Wiil-waal)

2. Seyidku sababaha uu ula xididey reer islaan waxa ay ahayad inuu ka helo_________
   (Saldano, Xoolo, Hiil, Hoodo)

3. Waxa ugu wanaagsan ee fardaha loo adeegsan jirey waxa ay ahayd_____________
   (Qurux, Qalasho, Xarrago, Dagaalka)

**B :Sharrxa kooban ka bixi tuducyadan soo socda** **(03 dhibcood)**

1. Xabiib baan ahaa jeer kufriga laygu xaasidey'e

   ______________________________________________________________________

   ________________________________________________________________1 dhibic

2. Inaan kuu xaf gooyaan jeclaa geel xawaad badane.

   ______________________________________________________________________

   ________________________________________________________________1 dhibic

**C** :Qor tuduca muujinaya in seyidku ka xumaaday warkii uga yimid seedigiis islaan Aadan.

______________________________________________________________________

________________________________________________________________1 dhibic

I. MAAHMAAHYO

**Kuwan soo socda ka qor min hal maahmaah** **(05 dhibic)**

a. Caanaha

______________________________________________________________________

b. Fardaha

______________________________________________________________________

c. Geedaha

______________________________________________________________________

d. Sagaarada

______________________________________________________________________

e. Waayeelka

______________________________________________________________________



©PNEB, 2013

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

## II. HEES HAWLEEDYO (10 dhibcood)

Hees hawleed kasta u hor qor meesiga leh ,adiga oo adeegsanaya meesha bannaan.

Raac tusaalaha lanbar eber ( min hal dhibic)

| | | | |
|---|---|---|---|
| 0 | Awlalka xarkagay oo xayaabada xagga sare ku leh xaayo mooyee ma waxlaa jira. | Idaha | |
| 1. | Giirooy garooy geesa xanbuseey,in la guurey garo oo gararafleey. | | Dameeraha |
| 2. | Afar jaamood oo jag iyo jag ah oo jinni u tolay ku jagleeyoow | | Riyaha |
| 3. | Xaayo niman dhaqan xor maqaatoo xariir ma huwado | | Lo'da |
| 4. | Adoo dhalay iyo adoo dhaqayo ah,heehaay labadab dhaay lagaa maal,oo dhexdaa kurus oo dhashaa nirig. | | Idaha |
| 5. | Ma fiyoobidoo ku arkay ,xarigiina lama furine ma furtaa lagaa dhuugey | | Caano-lulka |
| 6. | Cayn habari kugu jiidaad la calaacalaysaayoo la cabaadday cagayare | | Carruurta |
| 7. | Hadduu duhursado oo is dabagalo,doob u riiriyo daangaslaw shuba. | | Shubaasha |
| 8. | Waxaa wiilowda la hayo,waxaa lala waalnaayo,aduunbaygala wanaagsan,Allow adan waalaloobin. | | Geela |
| 9. | Geedba geedka u dheer laga garaacyeey,Galool mudhay maydhaxdiisaay. | | Salsalka |
| 10. | Hadduu ximan tago oo xarfada cuno xoodhka geeliyo xaydh idaadloow. | | Kebedda |



©PNEB, 2013

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

III. GOOGAALAYSI IYO CARRAB JALQIN (02 dhibcood)

**Weerahani waxa ay isugu jiraan ,googaalaysi iyo carrab jalqin,ee mid walba ku hor qor waxa ay tahay.**

1. Is guduudis is garoobis aan la guursan________________________________
2. Rati wada badara oday orod barad ah________________________________
3. Biciid barqo bilcil daaqay jilbo baldhaq________________________________
4. Laf saguaro lebi dakhartay________________________________

**Q/4AAD: HIDAHA IYO DHAQANKA SOOMAALIDA…………………………….14 dhibcood**

I. GOOBO GELI XARAFKA KA HORREEYA WARCELINTA SAXDA AH (06 dhibcood)

1. Dhasha geela waa la yiraahdaa:
   a. Weyl
   b. Qaayl
   c. Rujub
   d. Nirgo

2. Idaha iyo rihaya waxaa la isku yiraahdaa:
   a. Maqal
   b. Ishin
   c. Adhi
   d. Nugul

3. Hasha ilmuhu ka boxoee maqaarka ama candhosalaaxa lagu maalo waa:
   a. Igadh
   b. Madi
   c. Sidig
   d. Dhaqayo

4. Lo'da marka maalin walba lawaraabiyo waxaa layiraahdaa:
   a. Ladaab
   b. Kamiin
   c. Hormo
   d. Aroor

5. Magaca loo yaqaan neefka caanaha badani waa:
   a. Baaqimo
   b. Badho
   c. Madi
   d. Tood

6. Xoolaha oo caato noqda waxaalagu magcaabaa:
   a. Tebis
   b. Xayeeshi
   c. Curad
   d. Gool

II. SHEEG SIDKA XOOLAHA (inta bilood oo ay ilmaha caloosha ku sidaan) (02 dhibcood)

1. Geela ________________________________
2. Lo'da________________________________
3. Adhiga________________________________
4. Fardaha________________________________


©PNEB, 2013
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

## III. NOOCYADA GUURKA

**Magacyadan bilaha ku jira mid walba waxaa loo yaqaan nooc guur ah nooc guur ah,hadaba magac walba ku beeg meesha ku habboon ee bannaan** **(02 dhibcood)**

{Geed fariisi, Herein, Xigsiisan, Godobtir}

1. Marka gabadhu ay deegaankeeda guur ka weydo oo ay meel kale aaddo__________
2. Marka ninka wax diley gabadhiisa ama walaashii la siiyo qoyska wax laga diley_____
3. Marka gabadha waalidkeed la weydiisto____________________________________
4. Marka ninku guursado xaaskiisa walaasheed________________________________

## IV. CABBIRAADDA ROOBKA IYO GEEDIGA

1. Roobka ciidda naba ee dusha sare aan dhaafin waxaa layiraahdaa.(04 dhibcood)
   a. Faraqarar
   b. Gacan
   c. Calaacal
   d. Kab la kac

2. Awrka rarani inta uu gelin socdo waa:
   a. Maalin gaal
   b. Minqaad
   c. Maalin sawaal
   d. Masaafo

3. Roobka welefka ah ee hela dhulka adag waxaa layiraahdaa:
   a. Tumay
   b. Saalo dhaqaajis
   c. Biyo qaad
   d. Shuux

4. Roobka subaxdii da'waxaa loo yaqaan:
   a. Bariiso
   b. Mayey
   c. Mir
   d. Jir

## Q/5AAD: ERAYO ……………………………………………………………………09 dhibcood

### I. ISKU DHIGID KALA DHIHID KALA MACNE

**Erayadani waa isku dhigid kala dhihid ,ee geli labo weerood** **(03 dhibcood)**

1. (Neef , neef)

   a. ______________________________________________________________

   b. ______________________________________________________________

2. (Ilmo , ilmo)

   a. ______________________________________________________________

   b. ______________________________________________________________


©PNEB, 2013
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

3. (Tuur , tuur)
   a. ______________________________
   b. ______________________________

4. (Yeel , yeel
   a. ______________________________
   b. ______________________________

5. Hoos,hoos)
   a. ______________________________
   b. ______________________________

6. (Xidid,xidid)
   a. ______________________________
   b. ______________________________

II. ERAYADAN ISUGU AADDI SIDA AY ISU LEEYIHIIN (03 dhibcood)

| | |
|---|---|
| 1. Oori | Xero |
| 2. Wabax | Cokan |
| 3. Oon | Maranti |
| 4. Feeyig | Gabadano |
| 5. Mooro | Dhiifoon |
| 6. Dhaxan | Harraad |

III. ISKU BEEG ERAYADAN IYO LIDADKOODA (03 dhibcood)

| | |
|---|---|
| 1. Aar | Yac |
| 2. Qalanjo | Gosol |
| 3. Daaxuur | Saayo |
| 4. Saryan | Arbe |
| 5. Atoor | Gool |


©PNEB, 2013
www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com
SOM EXAMS

**Q/6AAD: WEYDIIMO LUUQADEED……………………………………………04 dhibcood**

KA WARCELI DHAMMAAN WEYDIIMAHAN SOO SOCDA

1. Waa maxay luuqadi?

1 dhibcood

2. Qor afar eray oo ah erayada hamsadu gasho?

1 dhibcood

3. Sheeg labo meelood oo uu qoraalka ka galo xarafka weyni?

1 dhibcood

4. Haddii uu eray ka kooban yahay xarfo isu tegey ,maxay weeri ka kooban tahay?

1 dhibcood

**Q/7AAD: CURIS………………………………………………………………11 dhibcood**

Dooro cirisyada soo socda mid ka mid ah kana qor ugu yaraan hal bog

I. Guurka iyo caadooyinkiisa.
II. Ardayga iyo doorka nabadda



©PNEB, 2013

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

SOM EXAMS

## III. Warqad saaxiibtinimo



©PNEB, 2013

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com

©PNEB, 2013

www.somexams.com info@somexams.com © In cooperation with qalinqaad.com